# Xogta Medicaid-ka Dugsiga ee Waalidiinta

**Maamulka Caafimaadka ee Oregon (Oregon Health Authority)** ayaa maamula barnaamijka Adeegyada Caafimaadka ee Dugsiga lagu Baxsho (Medicaid-ka Dugsiga). Barnaamijkaan ayaa caawiya dugsiga asagoo u sahlaaya inay helaan magdhawga Medicaid ee qarashaadka adeegyada caafimaadka ee caymisku daboolo ee la siiyo dhalinta iyo carruurta ka diiwaan gashan Medicaid. Tusmadaan waxaa loogu talo galay inay bixiso jawaabaha su'aalaha badanaa la iswaydiiyo ee quseeya ogolaanshaha waalidka.

### Maxay dugsiyadu qarashka ugu dalbanayaan Medicaid?

Ka dalbashada Medicaid qarashka adeegyada caafimaadku waa qaab lacag dheeraad ah iyo khayraad lagu siinaayo dugsiyada iyo barnaamijyada. Lacagtaan ayaa loo adeegsan karaa shaqaaleysiinta adeeg bixiyaal dheeraad ah, bixinta adeegyo dheeraad ah, iyo xaqiijinta in ardaydu ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin si ay u helaan waxbarasho iyo hormar.

### Maxay dugsiyadu qarashkooda ka dalban karaan Medicaid?

Dugsiyadu waxay qarashkooda ka dalban karaan Medicaid ee adeegyada caafimaadka sida:

- Kalkaalinta
- Hadalka-Luuqada
- Baxnaaninta Shaqada iyo Jirka
- Caafimaadka dhimirka iyo Hab-dhaqanka
- Qiimeynada iyo Baaritaannada



### Qarash ka dalbashada Medicaid-ka Dugsigu ma saamaynaysaa dheefaha qoyskaagu ka helo Medicaid?

Maya. Kaalmada qarashka ee Medicaid-ka Dugsiga ayaan saamayn ku yeelan doonin dheefaha Medicaid ee qoysaska bulshada ama u qalmidda. OAR 410-141-3565(8)(D)(h).

### Dugsiyadu ma u baahan yihiin ogolaanshahaaga si ay qarash uga dalbadaan Medicaid?

Haa. Dugsiyadu waa inay helaan ogolaanshahaaga qoran kahor inta aysan qarash ka dalban Medicaid. Kahor inta aadan helin ogolaanshahaaga, dugsigu waa inuu ku siiyaa ogolaanshaha qoraalka ah ee kuu sheegaaya xuquuqdaada. Dugsigu waa inuu bixiyaa ogeysiiskaan sanad kasta oo soo socda kadib marka la helo ogolaanshahaaga.



### Ka waran haddii aadan bixin ogolaansho?

Xaqa ardaygaaga ee helitaanka waxbarashadiisa wax saamayn ah kama soo gaarayso haddii aad ogolaato ama diido qarashka dalbashada Medicaid. Ilmahaaga ayaa wali heli doonta adeegyada caafimaadka ee uu u qalmi lahaa inuu helo.

**Ma ka noqon kartaa ogolaanshahaaga hadhoow?**

Haa. Waad ka noqon kartaa ogolaanshaha wakhti kasta adoo qoraal ahaan ku ogeysiinaaya dugsiga.

**Dugsiyadu ma iga dalban karaa qarashka adeegyada caafimaadka ee lagu sheegay IEP, IFSP, ama qorshaha Qaybta 504 ee ardaygayga?**

Maya. Haddii ilmahaagu uu u qalmo inuu helo adeegga caafimaadka sida ku cad Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah ama Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta 1973, adeegga caafimaadka waa in lagugu siiyaa si bilaash ah.

**Xog noocee ah ayaa la baahin karaa? Yaa arki doona xogta?**



Sharciga Xuquuqda Waxbarashada iyo Sirta ee Qoyska (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA) waa sharci federaal oo difaacaaya diiwaannada waxbarashada ilmahaaga. Dugsiyada ayaa laga doonayaa inay ku dhaqmaan heerarka sirta ah ee ku jira FERPA. Tan waxaa ku jira wadaagista xogta loo adeegsanayo qarash dalbashada Medicaid. Xogta Aqoonsiga Shaqsiga ah ee la wadaagi karo:

- Magaca; taariikhda dhalashada; nooca adeegyada la siiyay, taariikhda adeegyada la siiyay, iyo cida siisay; diiwaannada xaadirista, iyo Lambarka Aqoonsiga Ardayga ee Gobalka (State Student Identification Number, SSID).

Yaa arki doona xogta ka baxsan shaqaalaha dugsiga:

- Maamulka Caafimaadka ee Oregon iyo Wakiillada
- Wakiillada Qarash Dalbashada ee Dhinaca Sadexaad (haddii la adeegsiga)

**Wixii su'aalo ah ee ku saabsan dukumentigan fadlan la xiriir:** Jennifer Dundon, Taxliiliyaha Hawgallada iyo Xeerka ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon (Oregon Department of Education), kala xiriir jennifer.dundon@ode.oregon.gov